



Baaq Saacidaya wada-akhriska

(Tips to Support Shared Reading — Somali version)

Akhriska la-wadaaga waxuu dhaca marka waalidka iyo ilmaha ay buug wada eegayaan ama wada akhrinayaan. Hase ahaatee, wada akhriska buugga wuu ka qiimo badan yahay iyadoo ilmahaagu ku akhriyaan, ama aad adigu u akhriso. Markaad khibradda wada-akhriska wadaageysan, ilmahaagu waxey akhriska baranayaan idinko ka wada hadlaya sheekada buuga ku qoran. Waxey kaloo ku dhiira gelineysa iney xiseeyan. (Ezell & Justice, 2005)

Sideey u ektahay Khibradda Wada-akhrisku?

Khibradda wada-akhrisku sadex nuuc ayeey ilmaha uga saacidda lukhadda iyo kobcidda akhris barashada:

- Ilmahaagu waxa faa'ido u ah, oo ay ku istareexayaan barashada kelmadaha iyo sawirada.
- Khibradda akhriska waxey isku xiriirineysa sawirada buugga ku sawiran iyo sheekada buugu ka hadlayo.
- Ilmahaaga dabadeed waxey khibradaan ula mid noqoneysa, waxyaabaha kale oo shaqsi ahaan ay garanayaan.

Habkaan wada-akhriska ilmaha akhrisku dhibaato ku yahay, wa lagu bari kara. Lakin waxa laga yaba in waalidku u baahan yihiin in ay dhowr talabood ku daraan khibradda. Waalidku waxey kaloo isticmaali karaan qalab teknolojiyadda ah, si ay ilmaha ugu dhiira geliyaan, oo ay u qiiroadaan markay arkaan sawiradda buugga ku sawiran. Wadajir, waxaad abuuri karta khibrad aad wadaagtan, oo aad ku akrisaan buug aad wada xiiseyneysan.

Xeelado aad isku deyi karto

Waxa jiro dhowr xeeladood oo ay macalimiintu isticmalaan si ay jawaabo uga helaan ardeyda. Waalidku, markey guriga jogaan, waxey isticmaali karaan xeelado la mid ah kuwa macalimiintu isticmalaan, si ay ilmaha uga caawiyaan barashada xirfadaha akhriska.

Faalo-bixinta

Khibradda wax-wada akhriska ku bilow faalo-boxin. Wax ka sheeg galka buugga iyo waxaad u maleyneyso in uu ka hadlayao: waxaan arka xayawaan badan oo ku sawiran galka buugga. Waxan maleynaya buuggan inuu ka hadlaayo xayawaanka. Buugga markaad akhrineyso, ku dhawaaq waxaad ku fikireyso, si ilmahaagu u barto.

Weydi Sua'alo

Weydii su'alo siinaya ilmahaaga fursad ay ku helaan khibrad wax akhris. Halkan waxa laga yaba inaad u baahantahay inaad hesho qalabka xiriirka-hadalka oo ay ilmahaaga isticmaali karaan si ay u xiriiran. Ha isticmaalin su'aalaha jawaabteedu noqon karaan "haa" ama "maya". Matalan, waxaad tiraahda, "Maxaad u malayneysa iney dhacayaan marka xigta."

Khibrad Xiriir ah u same

Waxa aad u akhrineyso ha la xiriiran khibradooda malmeed. Matalan, markaad akhrineyso buugga ku saabsan xayawaanka, waxaad oran karta "daanyeerku wa mid qosol leh" Ma xasuusata markaan daanyeerka ku aragnay carwada xayawaanka (Zoo).

U kaadi oo ka sug

Markaad wax u akhrineyso, u kaadi, oo waqti sii kaga fikiraan waxi su'aal ama faalo ah. Markaad waqti siyaado ah siiso, ilmuhu wey ka fikirayaan waxa ay akhrinayaan, oo waxey helayaan kelmado ay kaga jawabaan su'aalaha.

Fa'iidada marka wax la wada akhriyo

Akriska oo aad wadaagtan waxuu faidooyin badan u leeyahay adiga iyo ilmahaagaba:

- Waxaad ka heleysan waqti aad wada wadaagtan oo aad ku wada xiriirtan
- Dhiira gelin ayuu u yahay ilmahaaga, oo laga yaabo in aysan jecleyn akhriska
- Waxey ka caawineysa inaad fahamto habka ilmahaaga u xiriiri

Ilmaha isticmaala qalabka dooriya hadal-xiriirka, khibrada wax wada akhriska waxad ka heleysa fursad aad ilmahaaga ku caawin karto. Waxaad tusi karta ilmahaaga habka loo isticmaalo qalabka-xiriirka. Mitalan, waxaad tusi karta halka la riixo, oo kelmad qaas ah oranaya; sida “Taasi wa mid qosol leh” markaad buugga wada akhrineysan meel qosol leh.

Helista Bugaagta Dhiira Geliya Dhalinyarada Akhriska Dhibaato ku Qaba

Mid ka mid ah dhibaatooyinka ay dadku la kulman marka ay dhalinyarada u raadinayaan bugaag, waa helista bugaag sahlan akhriskooda, oo xiiso leh. Markad raadineyso bugaag akhris, raadi bugaag 1) aan dhareen akhriskooda oo mar keliya la akhrin kara, 2) ku qoran lukhad sahlan oo heerka ilmahaaga ah, 3) mawduuc ilmahaagu jecelyihiin oo ay garanayaan.

Bogaga hoos ku xusan wa kuwa ka caawinaya qodobadi aan kor ku soo tilmaanay:

Khoraal lo yaqaan – TarHeelReader.org

Khadka loo yaqaan TarHeelReader.org wa bog lacag la'aan ah oo loo naqshadeeyay waxbarashada dadka waaweyn. Dadka Qoray wa waalidiin iyo macalimiin aduunka oo idil ka socda, oo wax ka qora mowduucyo loogu tala galay dadka da'aad walba leh. Waxa jira bugaag badan oo dhalinyarada iyo kuwa d'adoodu yartahayba ka helayaan sida isboortiga iyo filmaanta. Markaad gasho bogga, waxaad eegi karta bugaagta adoo isticmalaya batoonka raadista. Waxaad bogga ka soo guurin karta oo daabacan karta buugaagta xiisaha leh.

Hadaad weydo buug ilmahaagu xiiseynayaan, waad is diwaan gelin karta oo adigaa ku qori kara sheeko aad ogtahay in ilmahaagu xiiseynayaan. Qaab qorista ka dhig mid sahlan, oo ah heerka akhriska ee ilmahaaga. Baq habka loo qoro bugaagta ah ayaad ka heleysa bogga.

Khoraal lo yaqaan Route 66 – route66literacy.org

Route 66 barnaamij waxbarasho oo aad ka dalban karto kombiutarka. Waxaad ka heleysa ficilo ka caawinaya khorista, kelmadaha iyo akhriska. Waxaad tagi karta kheybta akhriska, oo aad ka heli karta mowduuc akhris ee ilmaagu xiiseynayaan. Waxaad isticmaali karta daadihintaa (Tutor cues) ku tusaya khibrad wax-wada akhriska. Kheyb lacag la'aan ah oo aad tijaabin karto ayaa diyaar ku ah.

Bugaagta sawirada leh ee dadka waaweyn ka caawiya akhriska

Dooro bugaagta sawirada ee ilmahaaga soo jiidanaya. Khisooyinka madadaalada leh, naxdinta leh ama aan caadiga aheyn ayeey ilmaha waaweyn inta badan jecelyihiin. Bugaagta sida “No, David” oo uu qoray David Shannon, “Tough Boris” oo uu qoray Mem Fox, iyo “The Book of Bad Ideas” oo ay qortay Laura Huliska-Beith wa mitaalo wanaagsan. Bugaagtan iyo kuwo kaleba ayaad ka heli karta bogga ‘Picture Books for Older Readers’ oo ay isu soo aruurisay Dr. Karen Erickson ee xarunta waxbarashada iyo dib-udhaca (The center on Literacy and Disability Studies) ee jamacadda North Carolina Chapel Hill. Hadaad dooneyso in aad aragto tirade bugaagta, booqo webside-ka:

mbaea.org/documents/filelibrary/pdf/assistive_technology/dr_ericksons_class/Picture_Books.pdf

Hadaad dooneyso akhbaaro siyaado oo ku saabsan wax-wada akhriska iyo hab aad u isticmaali karto tiknologi in aad ku dhiiro geliso akhriska, la soo xiriir Xarunta Simon Technology ee PACER – PACER.org/stc/library.